



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Diisambar 16, 2021

Ku socota: Dadka adeegyada ku helaya guryahooda gaarka ah ama guriga qoyska ama mas'uuliyiintooda (CME, fadlan dadka la wadaaga kuwa aad taageertaan ee ay saameysay.)

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS)

Ujeedada: Meesha ka saarida “mas'uuliyada macmiilka” ee shuruuda lacag bixinta

Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid (CMS) ayaa dhawaan ODDS siiyay oggolaansho ay meesha kaga saaraan shuruuda loogu talagalay dadka ku nool guryaha qoyskooda in ay ka qayb qaataan kharashka adeegyada bulshada ku saleysan haddii dakhligoodu dhaafo heerarka qaarkood. Waxaa dhici karta in aad maqashay shuruudani iyada oo ah “mas'uuliyada macmiilka,” isku dheelitirka “offset” ama lacag la bixinayo “pay-in.”

Isbeddelkani wuxuu dhaqan galay Diisambar 1, 2021.

Haddii aad heshay warqad ka socota Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon oo kaa codsatay in aad bixiso qaddar lacageed oo go'an oo ku aadan adeegyadaada ama haddii aad hesho mid, fadlan iska dhaaf warqada.

Tani waxay khuseysaa kuwa ku nool guryahooda gaarka ah ama guriga qoyskooda. Haddii aadan hubin, fadlan la hadal maamulahaaga kiiska.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
[http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.